

## Saxitaan: Sharciga cusub ee soo baxay 1.6.2019 ma sababin in ay xuquuqda shaqadu ka dhamaato qof kaliyaata oo magangaliyo dalbade ah

Xuquuqda shaqada ee magangaliye dalbadeyaasha is baddal ayaa ku yimidday 1.6.2019 kadib marka la baddalay xeerka soo galeetiga qodob ku jira.

Is badalka qodobkaas xeerku wuxuu ahaa mid noocyo badan: fasiraadda xeerkaas ayaa noqday mid dhib badan waxayna noqotay inta caadiga ah in ka badan in lagaga wada hadlo saamaynta xeerkaas xafiiska iyo wasaaradda arimaha gudaha dhexdeeda. Ogaysiinadii an hore u soo galinay waan ka saarnay bogaggayaga internetka si an u joojino khalkhalka an ku keenay shaqaaleyaasha iyo shaqo bixiyeyaasha.

Sharciga cusub ee soo baxay 1.6.2019 ma sababin in ay xuquuqda shaqadu ka dhamaato qof kaliyaata oo magangaliyo dalbade ah.

Si kali yo laab ah ayaan idiinka codsanaynaa in aad naga raali galisaan in aan awoodi waynay arinkaas war bixintiisa in aan si cad hore ugu soo saarno.

## Xuquuqda shaqada ee 1.6.2019 laga bilaabo

Dalbadeyaasha soo xaraystay dalabka magangaliyada inta ka horaysay 1.6.2019:

- Haddii ad lahayd xuquuq shaqo 31.5.2019 wuu kuu sii soconayaa xaqaaga shaqadu ilaa inta ad ka helayso go'aan hirgalay oo waddanka lagaaga saari karo.
- Haddii ad lahayd xuquuq shaqo 31.5. anad heshay go'aan la hirgalin karo oo waddanka lagaaga saari karo 1.6. intii ka horaysay, xuquuqdaada shaqo way kuu sii soconaysaa ilaa inta go'aankaagu uu hirgalayo.
- Haddii xuquuqdaada shaqo aanay wali kuu bilaabmin 31.5. xuquuqdaada shaqadu waxay kuu bilaabmaysaa 3 bilood kaddib wakhtiga ad xaraysatay dalabka magangaliyada haddii ad wadatay dhokumenti sharciyaysan oo ad ku safri karto oo shaqaynaya ama haddii anad wadanin 6 bilood kadib wakhtiga ad dalabka magangaliyada xaraysatay.
- Xuquuqdaada shaqadu way kaa joogsanaysaa haddii ad hesho sharci dagganaansho ah ah. Wakhtigaas kadib xuquuqdaada shaqo waxay ku salaysanaanaysaa sharcigaaga dagganaanshaha.

Magangaliyo dalbadeyaasha 1.6.2019 ama wakhtigii ka dambeeyay soo xaraystay magangaliyada :

- Xuquuqdaada shaqadu waxay kuu bilaabmaysaa 3 bilood kaddib wakhtiga ad xaraysatay dalabka magangaliyada haddii ad wadatay dhokumenti sharciyaysan oo ad ku safri karto oo shaqaynaya ama haddii anad wadanin 6 bilood kadib wakhtiga ad dalabka magangaliyada xaraysatay.
- Haddii dalabka magangaliyada ad cusboonaysiisato ama ad dib u xaraysato wakhtiga xuquuqda shaqada ad sugayso dib ayaa loo soo bilaabayaa taas oo ay macnaheedu tahay in aad sugayso 3 bilood ama 6 bilood oo dambe..
- Xuquuqdaada shaqadu waxay kaa dhamaanaysaa marka go'aanka waddanka lagaaga saari karo uu yahay mid la hirgalin karo oo keenaya in waddanka lagaaga saari karo.



- Xuquuqdaada shaqadu way kaa joogsanaysaa haddii ad hesho sharci dagganaansho ah ah. Wakhtigaas kadib xuquuqdaada shaqo waxay ku salaysanaanaysaa sharcigaaga dagganaanshaha.

## Dalbadaha iyo shaqo bixiyuhu halkay ka heli karaan macluumaad ku saabsan xuquuqda shaqada?

Magangaliyo dalbade:

- Haddii ad hesho go'aan oggolaansho ah macluumaadka la xidhiidha xuquuqda shaqada waxay kuugu qorantahay go'aanka iyo kaadhka sharciga.
- Haddii lagu siiyo go'aan diidmo ah macluumaadka la xidhiidha joogsashada xuquudaada shaqada waxay ku qorantahay go'aanka.
- Go'aankaaga waxa lagugu ogaysiinayaa luqadaada hooyo ama luqad kale oo ad fahmayso. Haddii ad u baahato ogaysiinta waxa loo isticmaali karaa adeeg turjumaan hadal ah ama turjumaad qoran.
- Haddii anad wali helin go'aan shaqo bixiyahaagu waxa uu ka hubin karaa xuquuqdaada shaqo [taleefan ahaan](#) saacadda 9–12. Haddii ad heshay go'aan oggolaansho ah waxad xuquuqdaada shaqo ku caddayn kartaa adiga oo tusaya shaqo bixiyahaaga kaadhkaaga sharciga.

Shaqo bixiye:

- Waxad ka hubin kartaa xuquuqda shaqo ee qofka magangaliyo dalbadaha ah wakhti xaadirkan [taleefan ahaan](#) saacadda 9–12.